



Elevers plan mot kränkande behandling

Muxuu qorshaheenu ku saabsan yahay?

Qorshaheenu wuxuu ku saabsanyahay dhamaan caruuta iskoolkeena, in ay wanaag iyo nabadgelyo dareemaan. Qorshaheenu wuxuu ka hadlaa sida aan iskula dhaqmeeno iyo sida ay dhab u noqon laheed.

Ma ogtahay in ay jiraan sharciyada Midibtakoorka (Diskrimineringslagen) iyo sharciga iskoolka (Skollagen).

Qorshaheenagu wuxuu si fudud u sharaxayaa sida iskoolka Långbergsskolan uu ugu shaqeenaayo sharciyadaan iyo si ay ardayda dhamaan iskoolka ku helaan daganaasho, wanaag iyo nabadgalyo, iyo in ay hormar sameeyaan.

Isla qorshahaan ayaad ka aqrisan kartaa waxa laga wado midibtakoor, xad-gudub iyo xoogsheegasho. Waxaa kaloo ka aqrisan kartaa sida aad sameen kartid hadii uu qof loo geesto dhibaataada midibtakoor, xad-gudub iyo xoogsheegasho.



**QOFNA SAAXIIB UMA NOQON KARO QOF WALBO BALSE QOF
WALBO WUXUU SAAXIIB U NOQON KARAA QOF KALE.**

Foojignaan. Horay u aqri, qoraal muhiim ah ayaa jiro.

Hadii aan rabo in aan wax badan ka ogaado qorshaheena, maxaan sameeya?

- ★ Dhamaan inta iskoolkeena dhigato ama ka shaqeeso waxaa ku waajib ah in ay ogyihiin waxa ku qoran qorshaheena oo ku saabsan dhibaatooyinka midibtakoor, xad-gudub iyo xoogsheegasho.
- ★ Macluumaadka ku saabsan qorshaheena waxaa waalidiinta lagu wargalinayaa kulamada waalidka (föräldramöte). Waxaad xitaa ka heli kartaan boggeena internetka. Qorshahana iyadoo daawacan ayaad u qaadeesaan guryihiina.
- ★ Qorshaheena oo ku saabsan dhibaatooyinka midibtakoor, xad-gudub iyo xoogsheegasho, wuxuu yaali doona fasal walbo iyo fritids:ka. Hadii aadan ka helin qorshaha fasalkaaga fadlan u sheeg qof weyn si ay usoo dhigaan.



Maxuu yahay midibtakoor?

Midibtakoor waa marka uu qof wax ku dhahaayo ama ku sameenaayo qof kale, midaas oo yeeleeso in uu qofka dareemo in qiimihiisa bin'aadanimu ay liidato. Tusaale ahaan:

- ★ Sida dadka ka imaado wadamadda kale.
- ★ Sida dadka diimaha kale leh.
- ★ Sida dadka naafada ah.
- ★ Sida dadka jeceel u qaado dadka ee isku-jinsiga yihiin



Waa maxay xad-gudub?

Xad-gudubku waa marka uu qof wax ku dhahaayo ama ku sameenaayo qof kale, midaas oo yeeleeso in uu qofka dareemo in qiimihiisa bin'aadanimu ay liidato. Tusaale ahaan:

- ★ In uu qofka laka tooro, la garaaco ama la haraantiyo.
- ★ In waxyaabo xun-xun laga qoro qof kale sida baraha bulshada (sociala medier), sms, waraaqad iyo wixii la mid ah.
- ★ In qofka loo diido in uu la dheelo ilamaha kale.
- ★ In qofka loo indho-gadiyo ama in si kale lagu dareensiyo in qofkaas aan la jecleen.

Waa maxay xoogsheegasho?

- ★ Markii qofka lagu xad-gudbo marar badan waxee noqotaa xoogsheegasho.
- ★ Markii qof loo xoogsheeganaayo oo lagu fiirsado ama laga qeyb qaato xoogsheegashada waxee la mid tahay, xoogsheegasho.

Maxaad sameeneysaa haduu qof midabtakoor, xad-gudub ama xoogsheegaso sameenaayo?

Aad ayee muhiim u tahay in aad u sheegto qof weyn?

Waxee noqon kartaa:

- ★ Shaqaalaha iskoolka
- ★ Kooxda u qaabilsan nabadgalyada iskoolka
- ★ Maamulaha
- ★ Iskoolkuraatarka (Skolkurator)
- ★ Kalkaalisada iskoolka
- ★ Macalinka qaaska ah (specialpedagog)



Waxaad emeyl noogu soo diri kartaa emeylka ah:

trygghetsteam.gruvans.skola.langberg@nykoping.se ama warqad ku rid sanduuqa yaala madxafka banaankiisa.

- ★ Waxaad kaloo sameen kartaa in aad ku dhahdo, jooji, qofka xad-gudubka ama xoogsheegashada haayo. Wey adagtahay in aad jooji tiraahdo lakiin waa muhiim waana geesinomo.
- ★ Hadii aad aragto qof kaligiisa ah, aana haysan qof uu la ciyaaro, weydii haduu qofkaas rabo in uu kula ciyaaro.

Xusuusnoow in aysan aheen wariifnimo hadii aad u sheegto dadka waaweyn in uu ardayga iskoolka kula dhigto oo xad-gudub sameenaayo. **Taasi micnaheedu waa in aad tahay saaxiib wanaagsan!**



Sida uu iskoolka sameeye markii qof la midibtakooro, xad-gudbo ama xoogsheegasho lagu sameeyo

- ★ In ay ardayda dhamaan ee iskoolka ku nabad qabaan waxaa ka mas’uul ah qof walboo ka shaqeeya iskoolka.
- ★ Qof weyn hadii uu arko in qof loo xoogsheeganaayo ama lagu xad-gudbaayo, qofkaasi weyn isla markaas ayuu la hadlaa ardaydaas.
- ★ Qofkaas weyn wixii dhacay wuu diiwaan galinaa wuxuuna dokomuntigaas u diraa kooxda qaabilsan nabadgalyada iskoolka. Qofkaas weyn waa in uu xataa la hadlaa waalidiinta ardaydaas.
- ★ Hadii ay ardaydaas joojin waaye xoogsheegashada ama xad-gudubka oo arintaasna loo arko in ay tahay mid culus, waxaa arintaas isla markiiba loo gudbinaa kooxda qaabilsan nabadgalyada iskoolka.
- ★ Kooxda qaabilsan nabadgalyada iskoolka waxee aad ooga shaqeenaayaan arintaas ilaa ay ka joogsato.
- ★ Hadii ay arintu tahay arin aad u dhib badan waxaa isla markiiba la laga codsanaa waalidka in ay yimaadaan iskoolka.
- ★ Kadib markii ay arintaas dhamaato, kooxda qaabilsan nabadgalyada iskoolka waxee hubinaayaan in ay wax walbo fiicanyihiin.
- ★ Kooxda qaabilsan nabadgalyada iskoolka waxee war-galinaaya maddaxa iskoolka, wax walboo ku saabsan xad-gudub, midibtakoor ama xoogsheegasho. (Wargalintaas kuma qorno magaca ardayga ee qoseeso arintaas)



Talada kooxda qaabilsan nabadgalyada iskoolka

Qorshahaan ku saabsan midibtakoorka iyo arimaha xad-gudubka ah, waxaa qoraayo kooxda qaabilsan nabadgalyada iskoolka. Taladeena waa tan:

- ★ Hadii aad aragto qof kaligiisa ah weydii haduu qofkaas uu rabo in uu kula dheelo.
- ★ Dadkeena waaweyn wax walbo ma arki karaan mar walbo, marka waxaan u baahanahay caawinaadaada.
- ★ Hadii aad aragto waxaan OK aheen u sheeg qof weyn arinkaas. Waa geesinimo in aad qof weyn u sheegto waxii dhacaayo, waayo waxaa tahay saxiib wanaagsan.
- ★ Marwalbo waxaad waraaq u qori karataa kooxda qaabilsan nabadgalyada iskoolka, ugu rid sanduuqa yaalo madxafka banaankiisa.
- ★ Wanaagaaga iyo farxadaada waxee sameen ku yeelaneesaa dadka kale. Marka in aad faafiso waanag iyo farxad maaha wax dhib leh.
- ★ Hadii aad dareemesid xumaan, waligaa hala aamusnaanin, u sheeg qof weyn. Dad badan oo waaweyn ayaa iskoolka ka shaqeeya, adiga daraada. La hadal qofka aad ku kalsoontahay si aad isku caawisaan.
- ★ Iskoolkaan Långberg qof walbo waa soo dhaweeneena, qof walbana ku qiimo dadka kale.



Ku socoto waalidiinta

Dadkeena ka shaqeeya Gruvans skola Långberg aad ayee muhiim inoogu tahay in cunugaaga oo iskoolka xiiseenayo, kuna dareemaayo nabadgalyo, sidaas dareteeda ayaan rabnaa in aan idinka codsano dhowr qodob.

- ❖ Kow; hadii uu cunugaagu kuu sheego in ee wax dhib leh ka dhacay iskoolka fadlan lasoo xariir cunugaaga macalinka sida ugu dhaqsiyaha badan, ama kooxda qaabilsan nabadgalyada iskoolka.
- ❖ Labo; hadii aad maqasho in qof la dhibaateenaayo ama asiga dhibaato geesanaayo sida, midibtakoorka, xad-gudubka ama xoogsheegashada, fadlan lasoo xariir cunugaaga macalinka sida ugu dhaqsiyaha badan, ama kooxda qaabilsan nabadgalyada iskoolka.
- ❖ Saddex; hadii uu cunugaaga isticmaalo adeega baraha bulshada (sociala medier) fadlan kala hadal cunugaaga dhibaatooyinka ee barahaasi la haan karaan.
- ❖ Afar; fadlan ku dhiiri-gali cunugaaga in uu u sheego qof weyn hadii uu dareemaayo nabadgalyo xumo ama xumaan.

Kooxda qaabilsan nabadgalyada iskoolka:

Emilia Lönnqvist, maamule ku xigeen

emilia.lonnqvist@nykoping.se

Cecilia Hast, maamule ku xigeen

cecilia.hast@nykoping.se

Anneli Lindqvist, kurator

anneli.lindqvist.1@nykoping.se

Louise Öberg, macalin qaas ah

louise.oberg@nykoping.se

Jessica Isaksson, macalin qaas ah

jessica.isaksson@nykoping.se

Xantippa Amaya, caawiye macalin

xantippa.amaya@nykoping.se

Sahro Hashi, caawiye macalin

sahro.hashi@nykoping.se

Maria Larsson, caawiye macalin

maria.larsson@nykoping.se

Miranda Ulfsson, macalin fritids

miranda.ulfsson@nykoping.se

Eric Englund, caawiye arday

eric.englund@nykoping.se

Ferdinand Sipöcz

ferdinand.sipocz@nykoping.se